**SHARCI 22 Jannayo 1964, Lr.4**
**Doorashooyin Siyaasadeed.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

MARKUU ARKAY ansixinta Golaha Ummadda;

**WUXUU SAXIIXAYAA**

Sharciga soo socda:

## CINWAANKA 1AAD

Qodobbo Guud

### Qod. 1
### Xildhibaannada loo dooranayo Golaha Ummadda

1. Tirada xildhibaannada loo dooran karo Golaha Ummadda waa 123.
2. Nidaamka iyo habka doorashaooyinka xildhibaannada waxaa nidaaminaya Sharcigan.

### Qod. 2
### Codbixiyayaasha

1. Waxaa codbixiye ah muwaadin kasta oo:
   a) sannadka doorashooyinka la qabanayo, gaaray ugu yaraan da'da toban iyo siddeed sano;
   b) ayan Hay'adda Garsoorka (Maxkamad) ku dhawaaqin in uu waalan yahay;
   c) aan laga mamnuucin qabashada hawl xafiis dawladeed, lagana qaadin xuquuqda doorashooyinka, xukun ciqaab ah oo lagu riday awgiis;
   d) aan xabsi ku jirin, asaga oo lagu fulinayo ciqaab dembi lagu xukumay.
2. Wasiirka Arrimaha Gudaha waxa uu u idman yahay in uu soo saaro qodobbo (axkaam) iyo in uu qaado tillaabooyin ujeeddadoodu tahay in la sugo in goob kasta oo codbixin, ugu badnaan, codbixiyayaalka caadiyan halkaas deggan.
3. codbixiye kasta waxa uu leeyahay hal cod oo kaliya.
4. codbixintu waa mid shakhsiyeed, mid loo siman yahay, xor, toos iyo qarsoodina ah.

### Qod. 3
### Qofka xildhibaan loo dooran karo

1. Waxaa xildhibaan loo dooran karaa codbixiye kasta oo, sannadka doorashooyinka la qabanaya, buuxiya dáda shan iyo labaatan sano, muujiyana in uu yaqaan wax akhrinta iyo wax qorista.
2. Xildhibaan looma dooran karo Garsooraha, Askariga Militeriga ama militeriyeysanaha, Guddoomiyaha Gobolka, Guddoomiyaha Degmada, Maamulaha Idman ee Degmada. Sababaha la soo sheegay oo doorasho u-qalmid laáanta, saameyn yeelan maayaan haddii qofka daneynayaa uu jaga (xilka) ka tago ka hor inta aan la geyn liistada ku xusan qodobka 12.

**Qod. 4**
**Isdiiddanaansho**

Xilka xildhibaanka waa mid ay is-diidayaan xilalka ku xusan faqradda labaad ee qodobka 3, iyo weliba kuwa Duqa Magaalada, La-taliyaha Degmada, La-taliyaha Dawladda Hoose, shaqaalaha Dawladda iyo wakaaladaheeda. Haddii xildhibaanku uusan doorbidin xilka cusub, 15 maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta magacaabista ama doorashada, waxa uu weynayaa xaqa uu u leeyahay xilkaas.

**Qod. 5**
**Soo-bandhigidda doorashooyinka**

1. Doorashooyinka xildhibaannada waxaa lagu soo bandhigayaa Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ayada oo ay tasdiiqayaan Wasiirka Kowaad iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, muddooyinka ku xusan qodobbada 52 iyo 53 ee Dastuurka.
2. Xeerka waa in uu tilmaamo taariikhda codbixinta.

**Qod. 6**
**Dhulka Qaranka oo loo qaybqaybiyo goobo codbixin**

1. Doorashooyinka dartood, Dhulka Qaranka waxaa loo qaybqaybinayaa goobo codbixin.
2. Goob kastoo codbixin waxaa loo sii kala qaybinayaa laamo codbixin. Laamo u kalaqaybinta goobta codbixinta waxaa lagu jideynayaa goáanka Wasiirka Arrimaha Gudaha, ugu yaraan afartan maalmood ka hor taariikhda doorashooyinka, ayada oo ku qotonta soo-jeedin uu soo qaabiyey Guddoomiyaha Degmada ee awoodda u leh, ka dib talada Golayaasha Degmada iyo Dawladda Hoose ee daneynaya.

**Qod. 7**
**Nidaamka Doorashada**

1. Tirada xildhibaannada laga soo dooranayo goob-codbixin oo kasta waxa ku caddahay shaxda ku lifaaqan Sharcigan.
2. Xisbi kastoo siyaasadeed, oo sí shaciga waafaqsan loo dhisay, waxa uu awoodi karaa in uu goob kasta oo codbixin u qaddimo liisto ay ku qoran yihiin musharraxiin aan ka yarayn laba-jibbaar kana badnayn saddex-jibaar tirada xildhibaannada laga soo dooranayo goob kasta ee codbixin.
3. Kuraasta xildhibaannimada waxaa loo qoondeeyey liista kasta, ee murashaxiin, loogu qoondeeynayaa sí ku saleysan **isu-dheellitirnaanta** Codadka ay liista kasta ka keentay goobta-codbixin, ayada oo la raacayo habka saamiga doorashada, iyo haraagga ugu badan.
4. Haddii goob ka mida goobaha codbixinta laga qaddimo hal liisto oo ku-kaliya, lama gudagelayo codbixinta, waxaana lagu dhawaaqayaa in la doortay musharraxiinta ku qoran liiska, sida ay u kala horreeyaan, ilaa laga gaaro tirada kuraasta loo qoondeeyey goobta codbixinta.

**CINWAANKA 2AAD**
Qaddimidda Is–Sharraxidda

**Qod. 8**
**Qaddimidda liiska musharraxiinta**

1. Qoraalka lagu soo qaddimayo liistada murashaxiinta, oo ay saxiixeen wakiillada, sharci

ahaan la aqoonsan yahay, ee Golaha Dhexe ama qaybta maxalliga ah ee xisbiga siyaasiga oo daneynaysa, waa in lagu muujiyo magaca, aabbaha, awoowaha, sannadka iyo meesha uu ku dhashay iyo haddii ay jirto, naaneysta musharraxiinta iyo sidoo kale goobta codbixinta oo ayagaas loo asteeyey.

2. Qoraalka lagu soo qaddimayo liiska waa in ay ku lifaaqan yihiin:
   a) calaamadda liistada, oo muunad afar nuqul ah;
   b) caddeyn qoraal ah oo uu saxeexay murashax kasta, taas oo uu ku aqbalo murashaxnimada, kuna caddeeynayo jiritaanka shuruudaha ku xusan qodobka 3, ee Sharcigaan.
3. Musharraxa ku sugan Dalka dibeddiisa waxa uu musharraxnimada ku aqbali karaa xataa taar, asaga oo qoraalka aqbalaadda geynaya Safaaradda ama Qunsulidda ay Jamhuuriyadda ku leedahay, taas oo xafiis ahaan iska xilsaareysa gudbinta qoraalka.

**Qod. 9**
**Astaanta liistada**

1. Astaanta liistada, oo ku lifaaqan qoraalka qaddimaadda, waa in aan lagu khaldin tan liistooyinka kale ee loo soo qaddimay isla goobta codbixinta.
2. Calaamadda waa noqon kartaa muuqaal matal ah; laakiin waa inaysan ku jirin astaamo ama calamo dowlado ama astaamo dabeecad qowmiyadeed.
3. Xisbi kasta waa reebban tahay inuu isticmaalo isla astaan Liis oo ay xisbiyo kale ku isticmaaleen doorashooyin hore.
4. Xisbi kasta wuxuu isku hal astaan liis u isticmali karaa dhowr goob codbixin, ama ayaga oo dhan.

**Qod. 10**
**Saxiixyada qoraalka qaddimaadda liistada musharraxiinta**

1. Qoraal kasta, oo lagu qaddimayo liistada musharraxiin, waa in ay saxiixaan tiro ka mida codbixiyayaasha goobta codbixinta, oo aan ka yareyn shanboqol, kuwaas oo ku hor saxiixaan Guddoomiyaha Degmada ama Wakiilkiisa.
2. Saxiixaha qoraalka qaddimaada liiska musharraxiinta waxaa codbixiye u aqoonsanaya Guddoomiyaha Degmada ama wakiilkiisa, ayaga oo u maraya habraac kooban. Marka uu shaki jiro, Guddoomiyaha ama wakiilkiisa waxay sugitaan iyo baaritaan weydiisan karaa madaxda Hay'adaha Amniga Dadweynaha.
3. Waa mamnuuc in la saxiixo wax ka badan hal qoraal ee qaddimaad liis musharraxiin.
4. Qoraalka qaddimaada liis musharraxiinta waa in ay ku cad yihiin magacyada iyo cinwaannada saddex codbixiye, oo loo igmaday:
   a) inay xareeyaan qoraalka qaddimaadda liiska musharraxiinta, sí waafaqsan qodobka 12;
   b) inay fuliyaan hawl kasta oo kale oo ka dhalata, ee leh dabeecad habraac iyo fulineed.
5. Luminta sifahaa codbixiye, ee saxiixaha, burrin mayso saxiixidda horey loo sameeyey.

**Qod. 11**
**Diibaaji Dhigid**

1. Qoraalka lagu geynayo liista musharraxiinta waa in ay la socoto, oo haddii kale aan la aqbaleyn, curaar dhan Sh.So. 5.000 (shankun), oo la dhigayo qaybta khasnadda Dawladda ama Bangi ama Xafiiska Boostada, ayada oo loo shubayo Maamulka Dawladda.
2. Debaajiga waxaa lagu soo celinayaa amarka Guddoomiyaha Degmada haddii ay liistadu

hesho codadka lagama maarmaanka u ah doorashada ugu yaraan hal xildhibaan; haddii kale, lacagtaas barkeed waxaa lagu shubaa Khasnadda Dhexe ee Dawladda.

**Qod. 12**
**Xareynta Liistooyinka**

1. Qoraallada qaddimaadda liistooyinka waa in lagu xareeyo Xafiiska Guddoomiyahaa Degmada ee awoodda u leh ugu dambayn saacadda markay tahay 18 maalinta afartan iyo shanaad ee ka horreysa taariikhda Codbixinta. Muddadaas waa la dheereynayaa ilaa la dhammeystirayo hawlgallada saxiixidda liistooyinka (qod. 10), haddii ay dhacdo in Xafiiska Guddoomiyaha Degmadu ay weli hortiisa taagan yihiin saxiixayaasha liista, saacadda uu waqtigu dhacayo.
2. Guddoomiyaha Degmadu si dhakhso ah ayuu u hubiyaa saxnimada qoraalka qaddimaadda liistada iyo lifaaqyada. Guddoomiyuhu waxa uu lambar taxane ah siinayaa qoraallada la sugay in ay saxan yihiin, asaga oo rasiid ka bixinaya; waxa uu qoraallada ay sugnaatay in khalad yihiin, u celinayaa wakiillada ku xusan faqradda afaraad ee qodobka 10, asaga oo qoraal ku tilmaamaya sababha diiddada oggolaanshaha.
3. Lidka diiddada qoraalka qaddimaadda liistada musharraxiinta, waxa ay wakiillada, saddex maalmood gudahood, racfaan qoraal ah u qaadan karaa Maxkamadda Gobolka, ee dhul ahaan awoodda u leh, sababo xagga sharciyadda awgood, taas oo goáan kaga gaareysa saddexda maalmood ee xiga gudahood. Lidka goáanka diidda ah, ee Maxkamadda Goboka, isla muddadaas gudaheeda, waxaa racfaan xataa qaab telegram ah looga qaadan karaa Maxkamadda Sare, taas oo dib-u-dhac laáan goáan gaareysa ka hor maalinta soddonaad ee ka horreysa taariikhda codbixinta.
4. Rafcaannada ku xusay faqradda hore waxaa la soo jeedinaya ayada oo aan la marin qaab iyo habraac gaar ah, xataa hab caddeeyn taar ahaaneed.

**Qod. 13**
**Qoraalka Bayaanka ee Musharraxiinta**

1. Guddoomiye Degmo, ee kasta, waxa uu u hawlgelayaa isku-dubbaridka warqad bayaan, oo ay ku qoran yihiin, hadba sida loo soo kala hor qaddimay, liistooyinka musharraxiinta goobta codbixinta oo kala leh astaamahooda.
2. Waxaa kale oo uu hawlgelaa, maalinta kow iyo tobnaad ee ka horreysa taariikhda codbixinta, in uu warqadda bayaanka ku dhejiyo looxaanta lagu baahiyo aftida ee degmooyinka iyo dawladaha hoose iyo meelaha kale ee dadweynaha u furan, iyo bayaankaas la baahiyo sí kasta ayada oo la adeegsanayo dad shaaciyayaal ah, iyo, halka ay suurtagal ka tahay, xataa raadiyaha.

**CINWAANKA 3AAD**
Dacaayadda Doorashada

**Qod. 14**
**Bilow iyo dhammaad**

Kulamada la xiriira doorashooyinka iyo shirarka fagaare ee la xiriira doorashada waxa ay bilaabmaan goob kasta. oo codbixin, ka bilaabmayaan dib markii la shaaciyo bayaanka ku xusan

qodobka 13, waxayna dhammaanayaan afar iyo labaatan saac ka hor maalinta codbixinta. Lama oggola saf-saf u ban-baxid.

**Qod. 15**
**Dibedbaxyada iyo Shirarka la xixiira Doorashooyinka**

1. Dibedbaxyada iyo shirarka doorashooyinkaa waa in abaabulayaasha ay, ugu yaraan afartan iyo siddeed saac ka hor, ogeysiis ka siiyaan Guddoomiyaha Degmada dhul ahaan awoodda u leh, kaas oo dibedbaxyadaas iyo shirarkaas mamnuuci kara sababo guud ee xagga fayadhowrka, bedqabka, anshaxa, kala dambeynta iyo amniga, ama ku xiri kara habraac gaar ah ee waqtiga iyo goobta.
2. Isla degmo kaliya, kama dhici karaan in ka badan laba kulan, ama shir olole doorasho hal maalin gudaheed.

**Qod. 16**
**Bayaannada iyo waraaqaha dareengelinta ah**

1. Bayaannada qoraalka iyo waraaqaha daabacan oo dareen gelin ah oo dibadda lagu dhejiyo, ee la xiriira doorashooyinka, waa in la geeyo/dhigo, ugu yaraan afar iyo labaatan saac ka hor inta aan la dhejin ama shaacin, Xafiiska Degmada.Waxaa laga dhaafay dhammaan culeys kasta oo leh dabeecad canshuur.
2. Bayaannada qoraalka iyo Waraaqaha ay wax ku qoranyihin oo dadweyne loo qaybinayo, ee la xiriira doorashooyinka, waa ka mamnuuc goobaha cibaaddada.

**Qod. 17**
**Hub iyo Lebis Militari**

Dibad-baxyada iyo shirarka doorashada guud waxaa gebi ahaan ka mamnuuc ah sidashada hub iyo isticmaalka lebis nooca militariga ama lagu khaldi karo midkan dambe.

**CINWAANKA 4AAD**
Xafiisyo Doorasho

**Qod. 18**
**Qabanqaabada Doorashooyinka**

Xafiisyada Doorashadu waa:

a) Xafiisyada doorashada ee Laanta;
b) Xafiisyada doorashada ee degmada;
c) Xafiiska Dhexe ee Doorashada.

**Qod. 19**
**Xafiisyada Doorashada ee heer Laan**

1. Xafiisyada doorashada waxay ka kooban yihiin Guddoomiyaha iyo laba baare, kan ayagaas ugu dáda weyn ayaa ku leh xilka Guddoomiye ku-xigeen.
2. Laan kasta oo ka mid ah xafiiska doorashada waxa ay leedahay xoghaye.
3. Guddoomiyaha iyo baarayaal waxaa laga soo dhex dooranayaa codbixiyayaasha, sidoo

kale xoghayaha waxaa laga soo dhex dooranayaa dadka aan codbixiyayaasha ahayn, kuwa sida gaarka khibradda ugu leh.

4. Guddoomiyaha, Baarayaasha iyo Hoghayaha waxaa magacaaba gudoomiyaha degmada, kaas oo beddelkoodana sameeya, haddii loo baahdo.

5. Haddii ay timaado baahi degdeg ah, beddelidda baarayaasha ama Xoghayaha oo lama huraanka noqota inta lagu gudajiray codeynta waxaa sameynaya Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee qeybta, isaga oo beddelkooda ka dhex dooranaya dadka goob joogayaasha ah ee buuxiya shuruudaha ku xusan Sharciga.

## Qod. 20
## Xafiisyada Doorashada ee heer Degmo

1. Xafiisyada doorashada ee heer degmo waxay xarun ku leeyihiin Magaalo Madaxda

Degmada. Waxay ka kooban yihiin Guddoomiyaha iyo laba il-baadiye (ilaaliye), kuwaas oo kan ugu dáda weyn uu qabanayo xilka Guddoomoye Ku-xigeen.

2. Xafiiska doorashada ee degmo kastaa waxa uu leeyahay xoghaye iyo laba u-qaybsanayaal tirin.

3. Guddoomiyaha iyo ilbaadiyayaasha (ilaaliyayaasha) waxaa laga soo dhex dooranayaa codbixiyayaasha, sidoo kale Xoghayaha iyo U-qaybsanayaasha tirinta, waxaa laga soo dhex dooranayaa dadka aan codbixiyayaal ahayn, kuwa sida gaarka khibradda ugu leh.

4. Guddoomiyahaha, ilbaadiyayaasha ( ilaaliyayaasha), Xoghaynta iyo U-qaybsanayaasha tirinta waxaa magacaabaya, gudoomiyaha degmada, kaas oo awood u leh xataa beddelaaddooda.

## Qod. 21
## Xafiiska dhexe ee doorashada

1. Xafiiska Dhexe ee Doorashada waxa uu xarun ku leeyahay Muqdisho. Xafiiska waxa uu ka kooban yahay Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo saddex tiriyayaal.

2. Xafiiska waxaa loo xilsaaray hal Xoghaye iyo laba U-qaybsanayaal xagga tirinta codadka.

3. Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe, ee doorashada, waa Gudoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee Muqdisho; Guddoomiye ku-xigeenku waxaa noqonaya Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Banaadir ama qof sii-haaya jagadiisa.

4. Kaaliyayaashu waxaa laga dhex dooranayaa codbixiyayaalka (doortayaasha); Xoghayaha iyo U-qaybsanayaasha Tirinta codadka waxaa laga dhex dooran karaa dad aan codbixiyayaal ahayn, oo sí gaar ah khibrad u leh.

5. Kaaliyayaasha, Xoghaynta iyo U-qaybsanayaasha, xagga tirinta codadka,waxaa magacaaba Wasiirka Arrimaha Gudaha, kaas oo beddelkoodana magacaabaya, haddii loo baahdo.

## Qod. 22
## Wakiillada Xisbiyada Siyaasadeed

1. Guddiyada dhexe ama Qaybaha maxalliga ah ee xisbiyada oo sí sharci ah loo dhisay, waxay Xafiiska Dhexe ee Doorashada ama Xafiisyada doorashada ee ku yaal goobaha codbixinta oo ay geesteen murashaxiin, wakiil laga soo dhex xulay codbixiyayaasha, iyo weliba mid kale oo loogu talagalay in lagu beddelo haddii uu maqnaado.

2. Wakiillada xisbiyada siyaasadu waxay xaq u leeyihiin inay goobjoog ka ahaadaan

hawlgallada Xafiiska Dhexe, ee doorashada, oo loo xilsaartay iyo in ay aragtiyadooda ku lifaaqaan maxdarka codbixinta (dood-qoraalka laga sameeyey codbixinta).

3. Qoraalka magacaabidda waa in loo qaddimaa, ugu dambeyn maalinta tobnaad, ee ka horreysa taariikhda codbixinta, Gudoomiyaha Degmada, kaas oo wakiil waliba siinaya warqad qoraal ah oggolaansho in uu galo Xafiiska doorashada ee loo xilsaaray.

### Qod. 23
### Magacaabista iyo dhaarta xubnaha Xafiiska doorashooyinka

1. Magacaabista xubnaha Xafiisyada doorashooyinka waxaa la sameynayaa oo oo la ogeysiinayaa dhinacyada ay khuseyso, ugu yaraan shan iyo toban maalmood ka hor taariikhda codbixinta.

2. Ma jiro qof ka mid ah dadka la magacaabay oo u diidi kara xilka, haddii aysan ahayn sababo aan laga fursan karin oo la caddeeyey awgood. Ka-dhaafidda shardidaas waxaa awoodda u leh mas'uuliyadda magacaabista sameysay.

3. Ka hor intaanu xafiiska la wareegin, xubin kasta oo ka mid ah Xafiiska doorashooyinka waa in uu Guddoomiyaha Degmada hortiisa ku maraa dhaarta soo socota cod:

> “Waxaan ku dhaaranayaa magaca ALLE in hawlaha doorashooyinka, ee la igu aaminay, aan u fulin doono sí ku dheehan damiir, daacadnimo iyo ixtiraamka <<Sharciga>>”

4. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye kuxigeenka Xarunta Dhexe, ee doorashooyinka, waxay ku hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

### Qod. 24
### Maqaamka sharci

1. Dhammaan xubnaha xafiisyada doorashada, iyo waliba wakiillada axsaabta si sharciga waafaqsan loogu oggolaaday inay ka qaybgalaan howlgallada xafiisyada, shaciyan waxaa loo aqoonsanayaa, inta ay gudanaan howlahooda, Saraakiil guud. '

2. Ma qaban karaan xilalka kor ku xusan: Xubnaha ciidanka milatariga, kuwa la ciidameeyey, Gudoomiyayaasha Gobollada, Gudoomiyayaasha Degmooyinka ama Wakiillada Degmooyinka, Duqowda Magaalooyinka, iyo musharrixiinta goobaha codbixinta.

### Qod. 25
### Maqaamka dhaqaale

1. Xubnaha xafiisyada doorashada waxay xaq u leeyihiin gunno maalmeedda soo socota:
   - Guddoomiye …… …… …… …… …… …… …… …… …… …… Sh.So. 40
   - Madaxweyne kuxigeenka xafiiska dhexe …… …… …… …… Sh.So. 35
   - ilbaadiyayaasha (Ilbaadiyayaasha), Kaaliyeyaasha, Xoghayayaasha iyo U qaybsanayaasha tirinta codadka …… …… …… …… Sh.So. 30

2. Gunnada maalmeed waxaa lagu muteysanayaa maalin kasta oo sí dhab ah looga qeybgalo hawlgallada Xafiisyada doorashooyinka. Shaqaalaha dawladda ama shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda hoos yimaada, waxaa gunnadaas lagua dhimayaa kalabar oo bar.

3. Maalin kasta oo ay lagama maarmaan noqoto in xubnaha Xafiisyada doorashada ay ku sugnaadaan meel ka baxsan degaannadooda caadiga ah, hawl awgeed waxa ay qaadanayaan gunnooyinka soo socda:
   - Guddoomiyaha …… …… …… …… …… …… …… Sh.So. 20
   - Ilbaadiyayaal(ilaaliyayaasha), Kaaliyeyaasha, Xoghayayaasha iyo U-qaybsayaasha tirinta codadka …… …… …… Sh.So. 15

**Qod. 26**
**Il-baadin sare**

Il-baadintaa sare ee habsami u-socodka hawlgallada doorashada iyo dabaqaadda saxda ah, ee sharciga, waxaa leh Wasiirka Arrimaha Gudaha.

**CINWAANKA 5AAD**
Hawgallada Qabanqaabada

**Qod. 27**
**Agabka Xafiisyada Doorashada**

1. Wasaaradda Arimaha Gudaha waxay Xafiis kastoo doorasho, ee Laan, u diyaarineysa agabka soo socda:
   a) Nuqul ka mid ah Sharcigaan;
   b) baakad lingax/moor ku afxiran yahay oo ay ku jirto shaambadda xafiiska doorashada, ee qaybta, oo ay raacsan tahay qasac qad leh khad;
   c) baakad moor saaran yahay oo ay ku jiraan waraaqaha cod-bixinta;
   d) Sanduuqa cod-bixinta;
   e) Sanduuq yar oo loogu talo galay waraaqaha/kaararka codbixinta;
   f) sedex daabacaado ee maxdar oo loogu talagalay howlgalka Xafiiska Doorashada.
   g) jadwallada tirada cod-bixinta;
   h) tiro macquul ah oo qalin laabis ah, si loogu muujiyo codka;
   i) shan bayaan oo ay ku qoran yihiin habraaca ay tahay in codbixiyayaashu ay dhowraan marka ay codeynayaan;
   j) dhalo ay ku jirto khad aan tirtirmaynin;
   k) qalabka wax lagu qoro, iyo wixii kale ee loo baahan yahay.
2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay sidoo kale Xafiis kastoo Doorasho ee Dhexe u diyaarineysaa agabkan soo socda:
   a) nuqul ka mid ah Sharcigaan;
   b) baakad lingaxan oo ay ku jirto shaambadda xafiiska doorashada, qad iyo qasac ay shabbadda qadda ka qaadato;
   c) seddex foom oo lagu qoro hawlgallada Xafiiska Doorashada.
   d) Jadwallada tirada cod-bixinta;
   e) Qalab wax lagu qoro, iyo wixii kale ee loo baahan yahay.
3. Agabka xafiis kasta oo doorashada ah waa in lagu aruuriyaa sanduuqyo yaryar oo loogu talagalay, oo ay Wasaaraddu, waqti ku habboon gudahiisa, u direyso, ayaga oo xiran, lingax saaran yahay uuna la socdaan sanduuqyada doorashada, kuwaas oo ay Wasaaraddu, waqti habboon gudahiisa, u direyso Gudoomiyayaasha degmo ee awoodda u leh; marka laga reebo agabka loo qoondeeyey xafiiska dhexe ee doorashada, oo sí toos ah ugu sallimmeyso.
4. Wasaaradda waxa ay, isku mar, amreysaa in loo dirto laguna wareejiyo Gudoomiyeyaasha Degmooyinka, baakad lingaxan, oo ay ku jiraan tiro waraaqo codbixin oo keyd (dheeraad) ah oo ku filan, oo loogu talagalay Xafiisyada Doorashada, ee Laanta, iyadoo codsiyo sababeysan laga helay Guddoomiyayaashooda. Halka dhibaatooyinka khaaska ah ee xagga isgaarsiinta ay lagamamaarmaan ka dhigayaan dhacdooyinka shilalka, Guddoomiyaha Degmadu wuxuu ku aamini karaa hal ama in ka badan, oo ka mid ah Wakiillada, qayb ka mid ah waraaqaha codbixinta ee keydka (dheeraadka) ah ee ku jira baakado xirxiran, lingaxan, oo loo haynayo

Guddoomiyayaasha Xafiisyada Doorashada ee Laamaha ku yaal meelaha ka fog magaalo Madaxda.

**Qod. 28**
**Shaabbado, Maxdarro, Sanduuqyo doorasho, iyo Looxaanta tirin codbixinta**

1. Shaabbadaha Xafiisyada Doorashada, maxdarrada, sanduuqyada codbixinta, looxaanta

tirinta codbixinta mid kasta waa nooc kali ku ah Dhulka Jamhuuriyaada oo dhan.

2. Shaabbadaha waxay leeyihiin lambarin gaar ah oo isdajooga (tixane ah).

**Qod. 29**
**Waraaqo Codbixin**

1. Waraaqaha codbixintu waa warqado cad-cad oo adag, oo laga jari karo xirmo-buugeed istensil ah oo waraaqaha ay ka kooban tahay laba-laba isugu mataansan yihiin, mid kastana ay ka kooban tahay 100 warqaddood. Xirmo-buugeedyadu waxa ay goob waliba ee codbixin u leeyihiin lambarro isdayaal oo u gaar ah.
2. Waraaqaha Goob kasta oo Codbixin waa inay leeyihiin khaanado dadbanayaal ah oo loogu talagalay in lagu qoro astaamaha liistooyinka musharixiinta Goobta Codbixinta, iyo weliba - dhinaca xiga ayagaas - meel banaan oo loogu talagalay muujinta codeynta. Waa in sidoo kale uu leeyahay teekal xabageysan, sí loogu isticmaalo xiridda warqadda codbixinta, codeynta kaddib.

**Qod. 30**
**Qolal yaryar iyo sanaadiiq codbixin**

1. Laan kasta, ee xafiis doorasho, waa in ay diyaariso 2 qol oo yaryar oo loogu talagalay in codka lagu dhiibto, sí loo xaqiijiyo sirnimada.
2. Sanduuqa codbixita waa in la dhigo miiska Guddoomiyaha dushiisa ama agtiisa.

**Qod. 31**
**Tilmaamaha loogu talagay Codbixiyayaasha**

1. Hal nuqul oo ka mida warqad (bayaan) ay ku qoran yihiin tilmaamaha ku xusan qodobka 27aad, xarafka i) waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah laanta xafiiska doorashada ama goobta cod-bixinta gudaheeda iyo dibeddeedaba.
2. Sí sidaas la mid ah waa in loo dhejiyo nuqul ka mid ah bayaanka uu Guddoomiyaha Degmada u diyaariyey sí waafaqsan qodobka 13aad ayna ku qoran yihiin, ayaga oo ku asteysan lambarro tixane ah oo is-daba jooga, liistooyinka murashaxiinta goobta codbixinta iyo astaamahooda lagu yaqaan.

**Qod. 32**
**Agabka oo lagu wareejiyo Xafiisyada Doorashada**

1. Guddoomiyaha Degmada wuxuu diyaarinayaa sí, saacadda markay tahay lixda subaxnimo ee maalinta loo asteeyey codbixinta, loogu wareejiyo Xafiiska kastoo doorasho, ee Laameed, xarunta isla laantaas, sanduuqa yar iyo sanduuqa codbixinta ee loogu talagalay.
2. Guddoomiyaha Degmada waxaa kale oo uu wareejin u diyaarinayaa, saacadda markay

tahay 16ka ee isla maalintaas,sanduuqyada yaryar loo diray Xafiisyada doorashada ee heer degmo.

3. Ugu dambeyntii waxa uu amrayaa in Xafiis kasta oo doorasho lagu wareejiyo:
   a) nuqul ka mida goáanka magacaabista xubnaha Xafiiska;
   b) nuqul kamida ruqsadaha la siiyey wakiillada xisbi.

**CINWAANKA 6AAD**

Hawlgallada Codbixinta

**Qod. 33**

**(Qaab-dhismeedka Xafiiska Doorashada ee Laanta)**

1. Guddoomiyaha Xafiiska dorashada ee Laanta, markuu helo agabka ku xusan qodobka hore, ee la soo dhaafay:
   a) waxa uu ku dhaqaaqayaa dhismaha Xafiiska, asaga oo hubiyayaasha iyo xoghayaha ugu yeerayo in ay ka mid noqdaan;
   b) waxa uu ku casumayaa wakiillada xisbiyada, murashaxiinta u soo cayintay goobta, in ay goobjoog ka noqdaan hawlgallada codbixinta.
   c) Kaddib markuu hubiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa saxaaradda waxa uuna kontroolayaa agabka ku jira halkaas;
   d) kaddib markuu arko isla markaana kana hubinayaa dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabadda xafiiska iyo tan ay ku jiraan waraaqaha codbixinta, waxa uu saarayo shaabadda Xafiixka kuna ridayo sanduuqa yar, ee loogu talagalay;
   e) waxa uu baarayaa sanduuqa codbixinta, waa uu xirayaa, lingax saarayaa wuxuuna u dhaafayaa meel furan oo looga rido waraqaadda codbixinta goorta bixinta codka;
   f) waxaa uu ku dhaqaaqayaa meeleynta warqadda ay ku qoran yihiin farriimaha wargelinta codbixiyaasha;
   g) wuxuu xaqiijinayaa in la diyaariyo agabka/qalabka loogu baahan yahay codbixinta, sí hawgallada la xiriira ay nidaam ugu qabsoomaan.
2. Hawgallada kor ku xusan waxaa laga sameynayaa maxdar, ayada oo la tilmaamayo lambarka astaanta u ah shaabadda Xafiiska iyo dhammaan tirada waraaqaha codbixinta ee Xafiiska lagu sallimay.
3. Marka ay dhammaadaan hawlgallada kor lagu soo sheegay, Guddoomiyuhu waxa uu ku dhawaaqayaa in ay codbixinta furan tahay, sida uu qabo qodobka 39aad.

**Qod. 34**

**Awoodda Booliis ee Guddoomiyaha**

1. Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada, ee Laanta, waxa uu u xilsaaran yahay hoggaaminta hawlgallada booliis. Asagaas waxa uu adeegsan karaa ciidanka nabadgelyada sí u eryo ama u xiro kuwa gala dembiyo ama carqaladeeya habsami u socodka hawlgallada doorashada ama la yimaada calaamooyin muujinanayo cillad xagga maanka.
2. Ciidanka nabadgelyada, ayaga oo idin ka haysan Guddoomiyaha, ma geli karaan Xafiiska.
3. Madaxda rayidka ah iyo taliyayaasha ciidanka nabadgelyada waa in ay oofiyaan dalabaadka guddoomiyaha, sí loo xaqiijiyo xataa gelitaanka xorta ah ee codbixiyayaasha iyo in ay diidaan isu-imaatin dad ee ka dhaca agagaarka Xafiiska.
4. Awoodo kuwaas la mida waxaa leh Guddoomiyayaasha Xafiisyada doorashada, ee heer

degmada iyo Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe ee doorashada.

**Qod. 35**
**Gelitaanka Xafiiska**

1. Xubnaha ka tirsan Xafiiska iyo wakiillada xisbiyada ka sokow, waxaa Xafiiska laanta geli kara kuwa xaqa u leh inay codbixiyaan oo kaliya.
2. Codbixiyayaashu ma qaadan karaan hub iyo qalab wax dhima; waa in ay Xafiiska mid mid u galaan; waxaana loo oggol yahay in ay u-codbixiyaan sida ay u soo kala horreeyeen. Laakiin waxaa hormarin mudan qof kasta oo u xilsaaran fulinta hawlgallada doorashada.

**Qod. 36**
**Oggolaanshaha Codeynta**

1. Codbixiye kasta waxa uu codeyn karaa ka dib markuu:
   a) caddeeeyo tilmaamihiisa iyo dádiisa;
   b) helo aqoonsiga codbixiyenimo kana helo Xafiiska, kaas oo degdeg goáan ku gaaraya habraac kooban ee ku saleysan warqado aqoonsi, markhaati, iyo wax kasta oo kale oo caddeyn noqon ah.
2. Gacanta bidix dusheeda ama haddii ay ka maqan tahay, gacanta midig dusheeda ama haddii labaduba ka maqan yihiin, meel ka mid ah jirka codbixiyaha, ee la arki karo, ayaa waxaa la saarayaa calaamad muuqata oo lagu sameeyey khad aan tirtirmeynin.

**Qod. 37**
**Codbixiyayaal shakhsiyan loo diiday in ay codeeyaan**

1. Codka waxaa bixinaya qofka xaqa u leh, asaga oo shakhsiyan xaadiraya Xafiiska doorashada.
2. Qofka cillad xagga jirka, ee muuqata awgeed, ku sugan xaalad aysan suurtogal ahayn in uu kaligii bixiyo codka, guddoomiyaha ayaa u oggolaanaya in uu codeeyo asaga oo ay caawineyso qof kale ee uu ku kalsoon yahay.
3. Xoghayaha ayaa maxdarka ku qoraya sababta gaarka ah, ee darteed, codbixiyaha loogu oggolaaday in la caawiyo iyo weliba magaca codbixiyaha loo oggolaaday in la caawiyo iyo magaca qofka caawiyey.

**Qod. 38**
**Habka Codbixinta**

1. Marka la dhammeeyo hawlgallada ku xusan qodobka 36, guddoomiyuhu waxaa uu codbixiye kastaba, mar, u dhiibayaa waraaqadda codbixinta ee uu Xafiisku shaabadeeyey oo laga jaray buugga rasiiddada oo leh lambarro isugu xigxiga qaabka taxanaha ee la xiriira buugga ay ka midka yihiin.
2. Haddaba codeeyuhu waxa uu tegayaa qolka loogu talagalay in ay ka dhaceyso codeynta.
3. Codbixiyuhu waxa uu codka ku dul asteynayaa (cabbirayaa) waraaqda codbixinta, asaga oo meesha cad ee ku taal dhanka midig, ee astaanta liistada uu doorto, ku calaameynaya qalin laabis ah ee uu Xafiiska doorashadu bixiyey ama isla astaanta. Waxa uu isku laabayaa warqadda codbixinta, waana uu xirayaa warqadda codbixinta, asaga oo isticmaalaya xanjada wax la isugu dhejiyo, waxa uu ka baxayaa qolka, ugu dambeyn waxa uu warqadda codbixinta ku ridayaa sanduuqa codbixinta.

4. Isla marka uu sameeyo codeynta, codbixiyuhu waa iska tegayaa.
5. Haddii codbixiyuhu arko in warqadda codbixinta baabásan tahay ama ayasan dhammeyn waxa uu guddoomiyaha Degmada weydiisan karaa warqad codbixin, ee labaad, asaga oo celinaya tii hore. Arrintan dambe waxaa lagu xusayaa maxdarka.
6. Guddoomiyuhu waxa uu amri karaa in codbixiyayaasha ku daaha codbixinta laga fogeeyo Xafiiska, kaddib marka laga soo celiyo warqadda codbixinta, ayada oo codeynta loo oggolaanayo kaliya, kaddib markii ay wada codeeyaan codbixiyayaala xaadirka ah.
7. Guddoomiyuhu, haddii uu ogaado in codbixiyuhu uu haysto dhowr warqado codbixin oo ah nooc ka duwan kuwa la jideeyey ama uu yahay mid horey u codeeyey, waxa uu xajsinayaa ama gacanta ku dhigayaa warqadaha uu codbixiyo hayo waxa uuna degdeg ugu dhiibayaa ciidanka nabadgelyada, sí loogu gudbiyo hayadda garsoorka. Arrintaas waxa lagu xusayaa maxdarka.

**Qod. 39**
**Saacadaha Codbixinta**

1. Hawlgallada codbixinta waxaa la qabanayaa hal maalin oo kaliya, laga bilaabo saacadda markay tahay 7 ilaa 18 oo aan kala gó lahayn.
2. Codbixintu waa in ay socoto ilaa ay dhammaato codeynta codbixiyayaasha, saacadaha xiridda, xaadirka ku ah Xafiiska doorashada hortiisa.

**Qod. 40**
**Goáannada Xafiiska**

Xafiiska doorashada, ee Laanta, ayaa cod aqlabiyad ah, sí ku meel gaar ah, goáan ugu gaaraya, asaga oo ku xusayo maxdarka, wixii cabashooyin af ahaan iyo isqabadyo ah, ee la xiriira hawlgallada isla Xafiiska.

**CINWAANKA 7AAD**
Hawlgallada Xafiiska Doorashooyinka ee Qaybta

**Qod. 41**
**Hawlgallada Hordhaca ah ee Tirinta Codadka**

Kaddib markii codbixiyayaashu codeeyaan, Guddoomiyuhu wuxuu miiska ka banneynayaa xaashiyaha iyo wixii alaab ah, ee aan muhimka u ahayn kala-soocidda waraaqaha codbixinta iyo tirinta codadka wuxuuna:

a) ku dhawaaqayaa xiritaanka codbixinta;
b) hubinayaa tirada codbixiyayaasha;
c) wuxuu soo bixinayaa ee uu tirinayaa waraaqaha codbixinta oo aan la isticmaalin, waxa uuna ku ridayaa baakad loogu talagalay ee ku qoran lambar 1;
d) calaameynayaa waraaqaha codbixinta ee laga qaaday codbixiyayaasha, in ay xumaadeen ama aysan sax ahayn awgeed, wuxuuna ku ridayaa baakad loogu talagay ee uu ku qoran yahay lambar 2.

**Qod. 42**
**Tirinta Codadka**

1. Marka ay dhammaadaan hawlgallada ku xusan qodobka hore ee la soo dhaafay,

Guddoomiyaha waxa uu ku dhaqaaqayaa kala soocidda waraaqaha codbixinta. Ujeedkaas dartiis, mid ka mid ah hubiyayaasha ayaa warqadaha codbicinta marba mid ka soo saaraya sanduuqa codbixinta waxa uuna u gudbinayaa Guddoomiyaha. Guddoomiyuhu waa uu furayaa wuxuuna cod dheer ku sheegayaa Liistada-murashax, ee codka la siiyey, wuxuuna u gudbinayaa hubiyaha kale, kaas oo asaga iyo Xoghayaha ay wada tusayaan wakiillada liistada; wuxuu looxa tirinta codadka ku qorayaa codka ay heshay liistada, wuxuuna warqadda codbixinta, ee la tiriyey , ku ridayaa sanduuq loogu talagay. Waxaa reebban in warqad codbixin laga soo saaro sanduuqa codbixinta ka hor inta aan warqaddii ka horreysay la tirin, laguna ridin sanduuq loogu talagay. Waraaqaha codbixinta waxaa taaban kara xubnaha Xafiiska Doorashadaa oo kaliya.

2. Marka ay dhammaato kala-socidda waraaqaha codbixinta, Guddoomiyuhu waxa uu xaqiijinayaa tirada waraaqaha codbixinta, ee la kala-soocay, wuxuuna baarayaa in tiradaas ay u dhiganto tirada dhabta ah ee codbixiyayaasha iyo weliba isugeynta tirada codadka ay keeneen dhammaan liistooyinka, oo lagu daray tan codadka wax kama jiraanka, la burrin karo ama muranka ka taagan yahay sida uu qabo qodobka 44.

3. Haddaba, Guddoomiyuhu waxa uu suntayaa waraaqaha ku aaddan codadka wax kama jiraanka, iyo weliba xaashiyaha la xiriira ashtakooyinka iyo shucuur-muujimaha, wuxuuna dhammaan ku ridayaa baakada loogu talaglay ee lr. 3.

4. Guddoomiyuhu wuxuu kaloo uruurinayaa waraaqaha codbixinta, ee la tiriyey, waxa uuna ku ridayaa baakada loogu talagay ee lr. 4.

5. Ugu dambeyn, marka la gaaro xiritaanka hawlgallada tirinta codadka, Guddoomiyuhu waxa uu sí shaac ah ugu dhawaaqayaa tirada guud ee codbixiayaasha, codadka ansaxa ah iyo codadka ay liista kasta keentay (heshay).

**Qod. 43**
**Xiritaanka Hawlgallada Tirinta Codadka**

1. Marka ay dhammaadaan hawlgallada ku xusan qodobka kan ka horreyey, baakadaha oo dhan waa in lagu lingaxaa shaabadda Xafiiska, waana in ay lingaxaan Guddoomiyaha iyo ugu yaraan hal ka mid ah hubiyayaasha, iyo weliba wakiillada liistooyinka murashaxiinta oo sí caddaan ah u weydiista.

2. Daboolka kore ee baakad kasta, dushiisa waa in sí kooban loogu tilmaamo waxa ku jira baakadaas.

3. Dhammaan hawlgallada tirinta codadka waa in loo sameeyo sí aan kala gó lahayn ilaa laga dhammeystiro, lana sameeyo ayada oo la raacayo nidaamka la tilmaamay.

4. Hawlgalladaas waa in si sugan loogu sheego maxdarka.

**Qod. 44**
**Baabi’in iyo Muramo**

1. Waa wax kama jiraan codadka ka muuqda kaaraka la kala soocay oo:
   a) ka duwan nooca sharcigu jideeyey;
   b) aan lahayn shaabadda Xafiiska Doorashada;
2. Waa la burrin karaa warqadaha codbixinta oo marka la kale sooco:
   a) ay ka muuqdaan qoritaanno iyo calaamooyin oo aan loo baahnayn, oo loo qaadan kara in loo sameeyey sí aan dabiici ahayn;
   b) aysan ka muuqan wax cod ah oo lagu muujiyey, isla markaana aysan suurtogal ahayn in la aqoodo liistada murashax ee la doortay.
3. Waraaqaha codbixinta, ee ku xusan faqradda labaad, waxaa burrinaya Xafiiska

Doorashada oo ku soo saaraya qaraan lagu gaaray codad loo dhan yahay. Haddii ay dhacdo kala aragti duwanaansho waxaa lagu dhawaaqayaa in warqadda codbixinta ay tahay mid “lagu muransan yahay”.

4. Warqadda codbixinta “lagu muaransan yahay” waxaa goáan ka gaaraya Xafiiska Doorashada, ee Degmada.

**Qod. 45**
**Maxdarka Laanta**

1. Maxdarka Laanta waa in lagu qoraa qaabab loogu talahay, oo saddex muunadood ka kooban.
2. Laba muunadood oo ka mid ah maxdarka, ayaga oo ku jira sanduuq loogu talagay oo raacsan yihiin baakadaha lingaxan, ee ku xusan qodobka 43, waa in lagu wareejiyo Xafiiska Doorasha, ee Degmada; muunadda saddexaad waxaa lagu wareejinayaa Guddoomiyaha Degmada, ayada oo la raacinayo wixii agab doorasho, ee soo haray.

**Qod. 46**
**Daabulidda iyo wareejinta agabka**

1. Guddoomiyaha, oo uu la socdo ugu yaraan hal xubin oo ka tirsan Xafiiska isla markaana ay ilaalinayaan ciidanka nabadgelyada, waxa uu ku dhaqaaqaya, asaga oo la daahin, daabulaadda maxdarrada iyo baakooyinka ku lifaaqan iyo ku wareejintooda Xafiiska doorasha, ee Degmada.
2. Marka uu baakooyinka ku wareejinayo Xafiiska Doorasha, ee Degmada, waa in uu hubiyaa dhammida lingaxyada dul-saaran baakadahaas; Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada, ee Degmada, waa in uu ka bixiyaa rasiid.

**CINWAANKA 8AAD**
Hawlgallada Xafiiska Doorshada ee Degmada

**Qod. 47**
**Dhisidda Xafiiska Doorashada ee Degmada**

1. Marka uu helo agabka ku xusan qodobka 32, Guddoomiyaha Xafiiska, ee Degmada:
Waxa uu ku dhaqaaqayaa dhisidda Xafiiska, asaga oo ugu yeeraya in ay qayb ka noqdaan, Xoghayaha, iyo u-qaybsanayaasha tirinta;
    a) Waxa uu wakiillada xisbiyada ugu yeerayaa wakiillada xisbiyada soo murashaxiin u cayintay Goobta Codbixinta;
    b) Ka dib maka uu hubsado uuna hubiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa khaanadda, waxa uu ka soo saarayaa agabka ku jira waana uu kontroollayaa;
    c) Ka dib marka uu hubsado isla markaasna hubiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabadda Xafiiska waxa uuna lambarkeeda ku qorayaa maxdarka;
    d) Waxa uu agabka haray u gudbinayaa xoghayaha.
2. Xafiiska doorasha, ee Degmada, waxa uu sugayaa (dhowrayaa) helitaanka maxdarrada iyo baakadaha ku xusan qodobka 46, xagga Xafiisyada Doorashada, ee Laanta.

**Qod. 48**
**Qiimeynta iyo Tirinta Cododka**

Marka uu helo maxdarrada laga keenay Xafiisyada Doorashada, ee Laamaha ka tirsan goobta codbixinta, Guddoomiyaha Xafiiska doorashada, ee degmo, waxa uu ku dhaqaaqayaa hawlgallada soo socda:

a) Waxa uu xisaabayaa tirada guud ee codbixiyayaasha dhammaan Laamaha Goobta Codbixinta;
b) Waxa uu xaqiijinayaa codadka wax kama jiraanka ah iyo kuwa la burrin kara ee ka jira dhammaan Laamaha Codbixinta;
c) Waxaa uu goáan ka gaarayaa codadka muranka ka taagan yahay, sida uu qabo qodobka 44;
d) Waxa uu isugeynyaa codadka ansaxa ah oo ay liista kasta ka heshay dhammaan Laamaha Goobaha Codbixinta;
e) Waxa uu ku dhawaaqayaa natiijooyinka ku meel gaarka ah ee codtirinta.

## Qod. 49
## Maxdarka hawlgallada

1. Maxdarrada hawlgallada horey loo soo sheegay waxaa laga sameynayaa saddex muunadood.
2. Muunadda kowaad ee maxdarka, waxaa loo gudbinayaa Xafiiska Dhexe ee doorashada, ayada oo ay raacsiisan yihiin muunadda kowaad ee Laanta iyo wixii cabashooyin qoraal ah, ee la helay intii ay socdeen hawlgallada. Muunadda labaad ee maxdarka waxaa lagu wareejinayaa Guddoomiyaha Degmada. Tan saddexaad waxaa loo dirayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
3. Dhammaan agabka doorashada, ee soo hara, waxaa lagu wareejinayaa Guddoomiyaha Degmada oo ka bixinaya rasiid.

## CINWAANKA 9AAD
Hawlgallada Xafiiska Dhexe ee Doorashada

## Qod. 50
## Dhisidda Xafiiska Dhexe ee Doorashada

1. Marka uu helo agabka ku xusan qodobka 27, Guddoomiyaha Xafiiska Doorasha ee dhexe:
   a) waxa uu ku dhaqaaqayaa dhisidda Xafiiska, asaga oo ugu yeeraya in ay qayb ka noqdaan Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo U-qaybsanayaasha tirinta;
   b) waxaa uu ugu yeerayaa (ku casumayaa) in ay goobjoog ka noqdaan hawlgallada, wakiillada xisbiyada soo qaddimay liistooyin doorasho;
   c) Ka dib maka uu hubsado hubiyana dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa baakada, waxa uu ka soo saarayaa agabka (qalabka) ku jira waa kontroolayaa;
   d) ka dib marka uu hubsado hubiyana dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabbadda Xafiiska, waxa uuna lambarkeeda ku qorayaa maxdarka;
   e) waxaa uu agabka intiisa kale u gudbinayaa Xoghayaha.
2. Xafiiska Dhexe, ee doorashada, waxa uu haddaba sugayaa helitaanka maxdarrada ku xusan qodobka 49 xagga Xafiiska doorashada ee degmada.

**Qod. 51**
**Ku-dhawaaqidda Natiijooyinka Doorashada**

1. Marka uu helo maxdarrada dhammaan Xafiisyada Doorashada ee heer Degmo, Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe, ee doorashada, waxa uu ku dhaqaaqayaa hawlgallada soo socda:
   a) waxa uu goáan ka gaarayaa wixii khuseeya cabashooyinka laga keenay xagga hawlgallada codbixinta iyo tirinta codadka;
   b) waxa uu xisaabayaa tirada guud ee codadka ansaxa ah, codadka wax kama jiraanka iyo codadka la burrin karo ee dhammaan goobaha codbixinta ee degmooyinka;
   c) waxa uu hubinayaa tirada codadka liista kasta, macnaha isugeynta codadka ansaxa ah oo liistadaas ay ka heshay goobteeda codbixin;
   d) waxa uu xisaabayaa saamiga codbixin oo goob kastoo codbixin ee degmo, asaga, oo tirada guud oo ay heleen dhammaan liistooyinka goobta codbixinta, u qaybinaya tirada xildhibaannada laga dooranaya goobtaas codbixin;
   e) Waxaa uu liista kasta siinaya tirada kuraas ee kaga aadeysa inta ay yihiin saamiyada codbixineed ee ku jira tirada codbixinta, kuraasta soo hartana u qaybiyo liistooyinka helay haraagga ugu sarreeya, asaga oo tixgelinaya xataa kuwa gaaray saamiga, haddii ay dhacdo in haraagu isla ekaado, waxa uu ku dhaqaaqayaa qori-tuur;
   f) Waxa uu ku dhawaaqaya in la doortay, sida uu qabo qodobka 7aad, murashaxiinta goobta codbixin oo loo soo bandhigay liisto ku kali ah;
   g) Waxa uu shaacinayaa natiijooyinka kor ku xusan, asaga ogeysiis ku dhejinaya looxa Xafiiska, uguna yeeraya xildhibaannada laga soo doortay dhowr goob codbixin, in ay isticmaalaan xaqa door-bididda ee ku xusan faqradda labaad.

2. Murashaxa laga soo doorto dhowr goob codbixin waa in uu doortaa mid ka mid ah goobahaas, muddo shan maalmood ah gudahood, oo ka bilaabata marka la soo dhejiyo ogeysiiska ku xusan xarafka g) ee faqradda la soo dhaafay. Haddii taas aysan jirin, Xafiiska Dhexe, ee dorashada, ayaa kala doorashada ku sameynaya hab qori-tuur ah.

3. Kuraasta bannaanaata doorbididda dabadeed ama qori-tuurka, Xafiiska Dhexe, ee doorashada, ayaa u qaybinaya murashaxiinta ku xiga ka ugu dambeeya ee laga soo doortay isla liistada goobta codbixinta.

4. Xafiiska Dhexe, ee dorashada, waxa uu ku dhawaaqayaa natiijooyinka kama dambeysta ah, ee dorashada, asaga oo meel dadweynaha u furan ka akhrinaya maxdarka la xiriira.

**Qod. 52**
**Maxdarka Hawgallada**

1. Maxdarka hawlgallada la soo sheegay waxa laga sameynayaa saddex muunadood.

2. Muunadda kowaad ee maxdarka waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda; muunadda labaad waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha Qaranka; tan saddexaadna Wasiirka Kowaadka.

3. Dhammaan agabka doorashada, ee soo haray, waxaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ka bixinaysa rasiid.

**Qod. 53**
**Shaacinta Natiijooyinka Doorashada**

Qoraal kaaban oo laga minguuriyey maxdarka Xafiiska Dhexe, ee Doorashada, oo ay ku qoran yihiin magacyada xildhibaannada laga soo doortay iyo goobaha laga soo doortay, ayuu Guddoomiyaha Xafiiska amrayaa in lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

**Qod. 54**
**Bilawga Golaha Xeerdejinta**

1. Gole kasta ee Xeerdejin waxaa uu hawlihiisa bilaabayaa maalinta ku-dhawaaqidda Rasmiga ee natiijooyinka doorashada, ee ku xusan qodobka 54, faqradda afaraad, ee Sharcigan, ayada oo aan ku xirneyn taariikhda shaacinta isla natiijooyinkaas.
2. Golaha Qaranka waxaa uu sharciyan kulmayaa maalinta soddonaad laga soo bilaabo ku-dhawaaqidda, haddii uusan Madaxweynaha Jamhuuriyadda, sababo la xiriira baahi degdeg awgood, ugu muuqan in ay habboon tahat in la kulmiyo taariikhdaas ka hor.

**Qod. 55**
**Bannaanaan Kursi**

1. Haddii ay dib ka dhacdo in xildhibaan ka-joogsado xilka, kursiga la xiriira, ee lagu

dhawaaqay in uu bannaan yahay sí waafaqsan qodobka 59 faqradda afaraad ee Dastuurka, waxaa loo xilsaarayaa murashaxa ku xiga kii ugu dambeeyey laga soo dhex doortay isla liistada goobta codbixinta.
2. Ku-dhawaaqidda la-doortaha waxaa sameynaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

**CINWAANKA 10AAD**
Qodobbada Dhammaadka

**Qod. 56**
**Ku-xadgudubka xaqa dacaayadda**

1. Qof kasta, asaga oo adeegsanaya tab kasta, is-hortaaga ama carqaladeeya dacaayad la xriirta doorasho – mid guud iyo mid gaar ahba – oo sí sharci ah loogu dhawaaqay, ama is – hortaaga baahinta ama dhejinta waraaqo daabacan oo ah dacaayad la xiriirta doorasho, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa laba sano ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 2.400.
2. Isla ciqaabtaas waxaa muteysana (madanaya) qofkii isticmaala tabo (xeelado) ee uusan sharcigu oggoleyn, amaba jebinaya mamnuucidda (reebitaanka) ku xusan qodobka 15aad ee Sharcigan.

**Qod. 57**
**Ku-xadgudubka xaqa codeynta**

1. Qof kasta, asaga bixinaya, ballan-qaadaya, siinaya lacag ama nacfi kale ee shakhsi, ama asaga oo ballan-qaadaya, siinaya ama siiya ama gacan ku siiya in uu helo shaqo dawladeed ama gaara, ku-xadgudba xurriyada codka, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa saddex sano oo xarig ah ama ganaax ah ilaa Sh.So. 3.600.
2. Qof kasta, oo ujeeddooyinka kor ku xusan dartood, isticmaala xoog ama haddadaad, fal

iyo khiyaano (dhagar), waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa afar sano ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 4.800.

**Qod. 58**
**Laaluush la xiriira doorasho**

Codbixiyaha, sí uu u bixiyo ama u diido saxiixa soo bandhigidda liistada, ama sí uu u bixiyo ama u diido codka doorashada, oggolaada siismo ama ballanqaad lacaga ama nacfi kale ee shakhsi ahaaneed, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa saddex sano ah ama ganaax ah ilaa Sh.So. 3.600.

Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya laaluush-bixiyaha.

**Qod. 59**
**Is-hortaagga habsami u-socodka codeynta iyo tirinta codadka**

Qof kasta, asaga oo adeegsanaya xoog iyo haddadaad (cagajugleyn), is-hortaaga in sí xor ah loo dhiibto codka ama carqaladeeya habsami u-socodkdaa hawlgallada ka socda Xafiisyada doorashada, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa afar sano ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 4.800.

**Qod. 60**
**Gelitaanka Xafiisyada Doorashada ee aan la oggolaan**

1. Qof kasta, oo asaga oo aan xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlgallada doorashada, gala Xafiisyada doorashada ama ku dhex negaada in kasta oo loogu baaqay in uu ka baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa bil ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 100.
2. Haddii qofka uu hubeysan yahay, ciqaabta waa la laba-laabayaa.

**Qod. 61**
**Codbixin Xadgudub ah**

1. Qofka, asaga oo og in uusan xaq u lahayn in uu codeeyo, ama sheegta magac qof kale, u xaadiro in uu codbixiyo, amaba bixiya hal cod ka badan ama ayada oo loo xilsaaray in uu codka u bixiyo qof aan asaga shakhsiyan codeyn karin, codka u bixiya sí ka duwan sidii loo tilmaamay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa laba sano ama ganaax gaari kara ilaa 2.400.
2. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qof kasta oo Xafiiska uga been-sheega magaca iyo tilmaan qof kale, amaba haysta kaar sí uu codbixiyo xaalado iyo habab ka duwan kuwa sharcigu jideeyey.

**Qod. 62**
**Been-abuurid ama xadid dokumeeti iyo wax-ka-beddelid**
**xog la xiriirto doorasho**

1. Haddii laga reebo marka dhacdada uu ka ratibmayo dembi ka culus, qof kasta oo been-abuura kaar ama qoraal kale ee la xiriira hawlgallo doorasho ama wax ka beddela, xada ama baabíya dhammaan ama qayb ka mida qoraalladaas runta ah ama asaga oo og isticmaala qoraallo been-abuur ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa laba sano ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 2.400.
2. Isla ciqaabtaas waxaa mudanaya qof kasta, oo sí kasta beddela natiijooyinka doorashada.

**Qod. 63**
**Sabab laáan diidid ka mid noqosho Xafiis Doorasho**

Cid kasta, ayada oo loo magacaabay xil ka mid noqosha Xafiis Doorasho, oo sabab laáan diidda in ay qabato ama soo xaadiri weydo hawlgalka Xafiiska ama isaga taga oo cidleeya, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax al ilaa Sh.So. 600.

**Qod. 64**
**Ku-xadgudubyo kale ee Sharciga doorashada**

Cid kasta oo ku xadgudubta qodobbada Sharcigan, kuwaas oo aan loo dejin ciqaab gaar ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ah ilaa lix bilood iyo ganaax dhan ilaa Sh.So. 600.

**Qod. 65**
**Ciqaab Dheeri ah**

Ciqaabta dembiyada ku xusan Sharcigan, haddii Garsooruhu dabaqo ciqaabta xarigga ee aan ka yareyn laba sano, waxa ay muwaadanka ka qaadeysaa xuquuqda codbixinta muddo shan sano ah.

**CINWAANKA 11AAD**
Qodobbada Dhammaadka

**Qod. 66**

**Xeer-nidaamiye**

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxa loo igmaday in uu soo saaro xeer-nidaamiye ku saabsan diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo sida ayagaas loogu qaybinayo goobaha codbixinta, ee kala duwan iyo xeer kasta oo kale oo lagu fulinayo Sharcigan.

**Qod. 67**
**Baabiín**

Waxaa la baabíyey "Amarka lr. 9 ee Golaha Xeerdejinta (Doorashooyin), ee 1958", Sharciga lr. 26 ee 12kii disember 1958 (doorashooyinkii guud) iyo axkaam kastoo sharci ee ka soo horjeedda ama aan la socon karin Sharcigan.

**Qod. 68**
**Dhaqangalka Sharciga**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga, maalinta xigta.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ee Sharciyada iyo Xeerarka, waxaana lagu shaacinayaa (nashrinayaa) Faafinta Rasmiga.

Cid kasta oo ay la gudboon tahay waa ku waajib in uu u dhowro, iyo inuu inta kale ku khasbo in ay u dhowraan ka sharci ay leedahay Jamhuuriyadda.

Muqdisho 22ka Jannaayo 1964

Madaxweynaha
**Aaden Cabdulle Cusman**

Wasiirka Kowaad
Cabdi-Rashiid Cali Sharma'arke

Wasiirka Arrimaha Gudaha
Maxamuud Cabdi Nur

**LOOXA**

**XILDHIBAANNADA LAGA DOORANAYO GOOB KASTA OO CODBIXIN EE DEGMO**

| | | TIRADA XILDHIBAANNADA | |
|---|---|---|---|
| **GOBOLKA BARI** | | **DEGMO** | **GOBOL** |
| **Degmada** | **BOOSAASO** | **2** | |
| » | **CALUULA** | **1** | |
| » | **QANDALA** | **1** | |
| » | **ISKUSHUBAN** | **2** | |
| » | **QARDHO** | **2** | |
| » | **BENDERBEYLA** | **1** | |
| » | **EYL** | **2** | |
| » | **GAROWE** | **2** | **13** |
| **GOBOLKA MUDUG** | | | |
| **Degmada** | **GAALKACYO** | **4** | |
| » | **CEELBUUR** | **2** | |
| » | **CEELDHEER** | **2** | |
| » | **DHUUSAMAREEB** | **3** | |
| » | **HOBYO** | **2** | **13** |
| **GOBOLKA HIIRAAN** | | | |
| **Degmada** | **BELEDWEYNE** | **5** | |
| » | **BUULO BURDE** | **7** | **12** |
| **GOBOLKA BENAADIR** | | | |
| **Degmada** | **MUQDISHO** | **2** | |
| » | **MARKA** | **2** | |
| » | **QORYOOLEY** | **1** | |
| » | **JOWHAR** | **3** | |
| » | **CADALE** | **2** | |
| » | **AADEN YABAAL** | **1** | |
| » | **BARAAWE** | **2** | |
| » | **AFGOOYE** | **2** | |
| » | **WANLEWEYN** | **1** | |
| » | **BALCAD** | | **18** |
| **GOBOLKA JUBADA SARE** | | | |
| **Degmada** | **BAYDHABO** | **6** | |
| » | **LUUQ GANAANE** | **2** | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| » | BAARDHEERE | 2 | |
| Degmada | DIINSOOR | 2 | |
| » | XUDUR | 4 | |
| » | BUUR HAKABA | 6 | 22 |

**GOBOLKA JUBADA HOOSE**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Degmada | KISMAAYO | 3 | |
| » | JAMMAAME | 3 | |
| » | JILIB | 2 | |
| » | AFMADOW | 4 | 12 |

**GOBOLKA HARGEYSA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Degmada | HARGEYSA | 6 | |
| » | GABILEY | 1 | |
| » | BOORAAME | 3 | |
| » | SEYLAC | 2 | |
| » | BERBERA | 5 | 17 |

**GOBOLKA BURCO**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Degmada | BURCO | 5 | |
| » | OODWEYNE | 1 | |
| » | CEERIGAABO | 2 | |
| » | LAAS QOREY | 2 | |
| » | GARADAG | 1 | |
| » | LAASCAANOOD | 3 | |
| » | BUHOODLE | 2 | 16 |

**KHULAASADA TIRADA XIDHIBAANNADA**

| | |
|---|---|
| — Gobolka MajEERTENIYA | Lr. 13 |
| — Gobolka MUDUG | Lr. 13 |
| — Gobolka HIIRAAN | Lr. 12 |
| — Gobolka BENAADIR | Lr. 18 |
| — Gobolka JUBADA SARE | Lr. 22 |
| — Gobolka JUBADA HOOSE | Lr. 12 |
| — Gobolka HARGEYSA | Lr. 17 |
| — Gobolka BURCO | Lr. 16 |
| Wadarka tirada xildhibaannada | Lr. 123 |